# HABKA CODSIGA DIIWAANGELINTA KINDERGARTEN:

## Liiska Hubinta Qoysaska

Liiskan hubinta waxa uu qoysaska ka caawiyaa inay mushaaxaan Codsiga Kindergarten. Diiwaangelinta fasalka xannaanada ee sannad-dugsiyeedka 2025-26 waxay furmaysaa Janaayo 27, 2025. Haddii uu qoysku aanu awoodin inay online-ka ka codsadaan Kindergarten, fadlan la xiriir Xarunta Diiwaangelinta MNPS ee kuugu dhow si aad ballan uga qabsato. Macluumaadka meesha kuugu dhow ee Enrollment Center, booqo MNPS website ama la xiriir Xarunta Macluumaad Qoyska 615-259-INFO (4636).

### 1. OGOOW DUGSIGAAGA

**Qoysaska waxay ka helaan aagga dugsiga ubadkaaga.**

- Ka ogoow aagga dugsigaaga **www.mnps.org** www.mnps.org ama ka wac Xarunta Macluumaadka Qoyska 615-259- INFO (4636).
- Haddii aad rabto inaad codsato dugsi ka baxsan aaggaag, wac Xarunta Macluumaadka Qoyska wixii faahfaahin ah **MNPS School Options Application**. Haddii ay qoys ku codsadaan Codsiga Dugsiga Ikhtiyaariga ah, qoysku wali waxay u baahan doonaan inay ilmahooda ka diiwaangeliyaan kindergarten.

### 2. SOO URURI DHAMMAAN DUKUMENTIYADA LOO BAAHAN YAHAY

**Qoysasku waxay u baahan yihiin inay isu keenaan dukumentiyada soo socda si ay isaga diiwaangeliyaan kindergarten-ka.**

- Diiwaanka dhalashada (shahaadad dhalashada, baasaboorka, visa, I-94) - Carruurtu waa inay noqdaan shan jir **Ogosto 15, 2025 ama ka hor.**
- Diiwaanka Tallaalka ee Tennessee (TN) - Shahaadada Tallaalka ee rasmiga ah ee TN oo ka timid dhakhtarka ilmahaaga ama Rugta Caafimaadka Dadweynaha ee Metro.
- Caddaynta Caaritaan Jireed oo lagu sameeyay gudaha hal sano ee taariikhda isdiiwaangelinta.
- Caddaynta degenaanshaha Davidson County - Hadda (30 casho ama ka yar) biilka korontada ama telefoonka, kirada ama siyaasadda lahaanshaha guriga oo ku qoran yahaymagaca waalidka/mas'uulka.
- Teesaraha ID Waalidka/Mas'uulka - Waalidka/Mas'uulka waa inuu joogaa haddii aad shakhsi ahaan uga codsanayso.

### 3. DIIWAANGELINTA ARDAYDA MNPS EE HADDA JIRA

**ARDAYDA HADDA JIRTA EE MNPS: Qoysasku waxay kindergatenka iska diiwaangelin karaan the MNPS Campus Parent Portal.**

**Haddii aad hadda ka diiwaangeshan tahay Campus Parent Portal account:**

- Booqo MNPS Campus Parent Portal: **campus.mnps.org/campus/portal/parents/nashville.jsp** oo log-garee akoonkaaga.
- Tallaabooyinka isu diiwaangelinta kindergarten iyada oo la marayo MNPS Campus Parent Portal:
  - Waxaad tagataa **More** section oo ka xulo ikhtiyaarka **Online Registration**.
  - Xulo ikhtiyaarka **2025-2026 Rising Kindergarten Existing Student Registration**.
  - Macluumaadka gurigaaga ayaa si toos ah isu buuxin doona. Dib u eeg oo xaqiiji dhammaan macluumaadka.
  - Upload-garee Diiwaanka Tallaalka Tennessee oo hadda ah.
  - Guji oo gudbi foomka marka aad dib u eegto oo aad buuxiso.

**Hadii AADAN hadda ka diiwaan gashanayn akoonka Campus Parent Portal:**

- Qoysaskuwaxay u baahan dooonaan inay iska diiwaangeliyaan akoonka Campus Parent Portal. Wixii macluumaad ah la xiriira diiwaangelinta booqo: **www.mnps.org/students-families/familyportal**
- Marka lagu diiwaangeliyo oo aad gasho akoonkaaga, raac tallaabooyinka kore ee diiwaangelinta kindergartenka.

### 4. DIIWAANGELINTA ARDAYDA KU CUSUB MNPS

**ARDAYDA KU CUSUB MNPS: Qoysaska waxay online-ka iskaga diiwaangelin karaan kindergarten-ka.**

- Booqo **www.mnps.org/register-for-school** si aad isaga diiwaangeliso online-ka adigoo isticmaalaya the Online Registration Portal.
- **Haddii luuqad kale oo aan Ingiriis ahany lagaga hadlo guriga**, qoysasku waxay sidoo kale ubaahan doonaan inay wacaan Xafiiska Ingiriis Bartayaasha (EL) ay ballansadaan Qiimaynta EL 615-259-8608 ama u dir email elreg@mnps.org.
- **Haddii qoysasku aanay awoodin inay iska diiwaangeliyaan online-ka, fadlan la xiriir Xarunta Diiwaangelinta si aad u ballansato inaad iska diiwaangeliso.** Waalidka/mas'uulka waa inuu joogaa haddii aad qof ahaan isu diiwaangelinayso.
- **Si aad u ogaato Xarunta Diiwaangelinta kuugu dhow kala xiriir Xarunta Macluumaadka Qoyska ee ku taal 615-259- INFO (4636).**
- Scan-garee QR code-ka si aad u daawato muuqaalka habka isdiiwaangelinta (u gudub dhanka hoose): **www.mnps.org/learn/register-fr-school**

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan agabka iyo hawlaha ka caawinaya ilmahaaga inuu u diyaargaroobo kindergarten, booqo: **www.mnps.org/countdowntokindergarten**

METRO NASHVILLE PUBLIC SCHOOLS

Dugsiyada Dawladda Degmada Nashville (MNPS) ma sameeyaan takoor ku salaysan isir, diin, caqiido, jinsi, aqoonsiga waxaa tahay lab iyo dhedig, lab iyo dhedig midkaa ka heshid, wadankaad u dhalatay, midab, da', ama naafo si laguugu ogolaado, fursad aad ku gashid, ama u gudatid barnaamijyada, adeegyada, ama wax qabadka. MNPS ma takooraan markay shaqaalaha qaadanayaan ama ku hawlan yihiin shaqaalaynta. Si aad u codsato hawl fududayn, fadlan la xiriir maamulaha dhismahaaga ama madaxa waaxda. (Turjumaannada dadka dhegaha la' ama dhegaha culus waa in la codsadaa todoba iyo labaatan [72] saacadood ka hor dhacdada.) Su'aalo ama welwel la xiriira waxaa loo gudbin karaa Iskuduwaha ADA ee Dugsiyada Dadweynaha ee Metropolitan Nashville, ADA@mnps.org. .